## Waa maxay dhibaatada cunsiriyiinta midigta ?

Dhibaatada ama gacanqaadka cunsiriyiinta midigtu gaystan waa dagaal ad nacaybnimo ku salaysan iyo qof iska xukun ku salaysan. Dadka ay la dagaalamayan ula dagaali mayaan sababo la xidhiidha shaqsiyadooda iyo hab dhaqankooda , laakin qofka ama qofta dhibta gaysanaya waxay rabaan in ay qoraan mahadho sababtoo ah dhibanuhu kuma laha  goob sawirka Dunida ee midigta cunsuriyiinta yagana muhiim uma aha mahadhada ay gaysanayaan. dhibka way gaysanayaan qiimo kastaaba haw ugu kacdee. Cunsuriyadu way noocyo badan tahay  waxayna ukala baxda sidan:

- Yuhuud nacayb , nacayb looga so horjeedo qofta ama qofka yuhuudiga ah
- Nacayb looga so horjeedo dadka isku Jinsiga ah ee isu galmooda , iyo weliba nacayb looga so horjeedo dadka abuurtooda badalay sida nin naag iska dhigay ama naag nin iska dhigtay.
- Nacayb ay u qabaan dadka  iyaga ka afkaarta duwan dhanka siyaasada  iyo weliba dadka aan ahayn dhanka midigta
- Liidid ama yasid dadka bilaa hoyga ah iyo weliba iyago bulshada kala soocaya
- Liidid ama yasid dadka naafadda ah

In aad go,aansato oo aad cabrito dhacdo in ay tahay cunsurimimo waa garasho aad u saraysa marag furka marqaatiga qofka ama qofta ah wa talaabada xigta.

Opferperspektive
Beratung für Betroffene rechter Gewalt

Cinwaankooduna waa:
Rudolf-Breitscheid-Straße 164
14482 Potsdam

Telefoonka aad kala xidhiidhi karta :
Telefoon : 0331 8170000
Faagis :  0331 8170001

Email: info@opferperspektive.de
www.opferperspektive.de

Mashruucan waxaa maal geliyey

TOLERANTES BRANDENBURG

# CAAWIN

## DADKA LA KULMA DHIBAATADA CUNSURIYIINTA MIDIGTA

Latalin iyo caawin dhibanaha la kulma dhibaatada cunsuriyiinta midigta , waxa kaloo la caawinaya lanana talinayaa ,saaxibkiis, ehelkiisa iyo weliba markhaatiga.

**0331  8170000**

**www.opferperspektive.de**

## Maxaan ku qabankarnaa?

Kolka adi ama qof ku dhow ama asxaabtaada ah cunsuriyiintu midigtu ay caayaan, ama handadaan ama la dagaalaman, anaga ayaa ku caawinayna. Sidii ay ku caawin lahaayen la taliyayaashayadu adiga ayaa go, aan sanaya qaabka caawinta  aad rabto. Caawintu ama la talintu iyo la socodkuba  waxay noqon kartaa hal mar ama mid mudo dheer socota. Xataa dhalinyaradu anaga way nala soo xidhiidhi karaan xataa hadaan waalidku raali ka ahayn.

**Waxaad  Xaq U Leedahay**
Waxaan ku sharaxaynaa geedi socodka dacwada, waxaanu ku raacaynaa  Booliska iyo Maxkamadda. Waxaanu kaloo kaa caawinaynaa in aan ku raadino Qareen ama Qareenad.

**Xaalkaaga Bulsho**
Waxaanu ku sharxaynaa xaalkaaga, waxaan kaa caawinayna xaga magdhowga, iyo weliba in aan hesho xaqaaga ama Budhgooy, waxaanu kaloo kala talinaynaa dhanka caymiska iyo weliba wixi la xidhiidha dhaymadaada.

**Caafimaadkaaga**
Haddi aad dhaawacantay waxaan ku raadinaynaa daaweyn dhakhtar. Waxaad kaloo anaga nagala hadlaysaan Baqdinta ku haysa. Haddi aad u baahato dhakhtar saykoolaji ama cilmi nafsi ahna, waanu kugu xidhi.

**Bay,adaada iyo Bulshada kugu xeeran**
Haddi aad rabto, khatarta cunsuriyiinta ee adi kugu xeeran in qaab caam ah looga doodo. Waxaan kugu xidhayna ama ku keenaynaa ururo iyo weliba warbaahin.

## WAANU KULA TALINAYNA, ADIGA

**Goobta**
Waxaanu kugu imaanaynaa goob kasta oo aad ka joogtid gobolka Brandenburg, ama waxaan kugu casuumaynaa goobtayada ama xafiiskayaga.

**Bilaash**
Wax qarash ah oo adi lagaa rabaa ma jiraan.

**Luuqado Badan**
Haddi loo baahdo  ama ay lagama maarmaan tahay waxaan ku keenaynaa Turjubaan ama Turjubaanad.

**Si iskaa ah ama mutadawacnimo ah**
Waxaad go,aan sanaysaa, in lagu sameeyo la talin iyo weliba talaabada xigta ee aad rabto in aad qaado. Anaguna adiga waanu ku caawinaynaa.

**Aaminaad**
Waxkasta oo aynu kuwada hadalo aad baa lo ilaalinaya ama loo xafidayaa. Adigoon noo idmin ama noo fasixina uma sheegayno una dhiibimayno qof kale oo sadexaad.

**Madaxbanaani**
La talintayada iyo caawintayadubam waa mid ka madax banaan Dawlada.

**Labada Dhinacba**
Waxaanu xooga saaraynaa baahidaada, waxaanuna ku shaqaynaynaa rabitaankaaga.

## URURKA OPFERPERSPEKTIVE

Isbuuckasta dadbaa la garaaca ama lala dagaalama, sababta oo ah iyagu kuma soo baxayaan sawirka dunida ee cunsuriyiinta. Dadka la kulmay dhibtaa waxay dareemayaan maalin walba bilaa nabadgelyo iyo weliba bilaa amaan  ku darso iyada oo wakhti dheer ay ka soo wareegtay xiligii dhacdadu dhacday. Cabsidaasina waxay ku keliyeysanaysaa qofka. Waxaanu rabnaa in aan qofka tusno wadajir iyo weliba caawimo muuqata.

cunsuriyiinta midigta fog waxay aaminsanyihiin in ay iyagu yihiin majoorati oo ay sameynayan wax kasta. Hadaba anaga hadafkeenu waxa weeye mid taa ka duwan oo ah in aanu jebino derbiga aamusnaanta Suurona gelino saansaan cimileed ay dadku kuwada noolankaraan bilaa cabsi.

Ururka Opferperspektive waa goob la talisa dadka la kulamay dhibaatada cunsuriyiinta midigta fog wuxuna u diwaangashanyahay urur ahaan. Waxanu nahay una diwaangashanahay Opferperspektive urur aan faaido doon ahayn kana soo horjeeda Takoorka iyo Faquuqa , iyo weliba cunsuriyada iyo cunsuriyiinta midigta fog. urur ahaan waanu ka madax banaanahay siyaasad.

Waxaana na maal geliya mashruuca Tolerantes Brandenburg iyo weliba tabarucaadka.